# Wax ka oggow Heerarka Tobobaraha



## Waa maxay Heerarka Tobobaruhu?

Shanta Heerarka Tobobare waxay ka hadlaan aqoonta, xirfadaha iyo awooda aanu doonayno in aanu ku aragno tobobarayaasha gobolku ansixiyay. Heerarka:

- Waxay bixiyaa luuqad la wadaago oo la hadlaya diyaar garawga tobobaraha iyo taageerada.
- Abuurista bayaaminta ku saabsan sharaxa loogu talo geley tobobarayaasha iyo barnaamijyada tobobarka. Wixii macluumaad dheeraad ah, faldan akhri baahinta *Barnaamijka Heerarka Tobobaraha Gobolka Bixiyo ee DCYF* (EPS_0061) oo waxaa laga heleyaa onleyn ahaan **www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0061.pdf**.
- Tilmaamaha qorshaynta hormarka xirfadeed.
- U sheegitaanka hormarka barashada xirfadeed ee tobobarayaasha.

## Sidee U Kala Sareeyaan?

Mid walbaaba waxa uu leeyahay shan heer oo ka kooban aad wax ku ool. Mid kastaa oo aagaga ah wax ku ool ah waxaa loo jajabiyaa muujimo u dhaxeeya aas-aas ilaa mid aad u sareeya.

| HEERKA | WAX KU OOLNIMADA |
|---|---|
| Samaynta Qaab La Dagaalamaya Eexda iyo Cunsuriyada | • La socoshada nafta<br>• Nidaamyada hormariya sinaanta qoomiyada iyo cadaalada bulshada |
| Deegaanka waxbarashada | • Deegaanka waxbarashada macquulka ah<br>• Deegaanka waxbarashada la taaban karo<br>• Deegaanka waxbarashada maqal iyo muuqaalka ah |
| Diyaar Garawga iyo Hormarka | • Ka shaqaynta dhamaan ka qayb galayaasha<br>• Barashada xogta<br>• Nashqada muuqaalka |
| Fududaynta | • Taageerada ardayda dadka waawayn ah<br>• Khidadaha fududaynta |
| Qiimaynta iyo Naqdinta | • Qiimaynta waxaa lagu gaadhaa ujeedooyinka barashada (qiimaynta soo koobitaanka) |

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



## Korniinka iyo Hormarka Xirfadeed

Heerarka Tobobarasha waxaa lagu sharaxaa waxa xirfadlayasha loo baahan inay ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan. Waa inay isticmaalaan tobobarayaashu, cida tobobarayaasha tobobaraysa, iyo shakhsiyaadka kormeera tobobarayaasha si loo go'aamiyo nooca hormarka xirfadeed iyo barashada ee shakhsiga ku haboon.

Hadii aad taageerto tobobarayaasha hay'adaada:

- Inaad barato Heerarka Tobobaraha.
- U isticmaalka Heerarka Tobobaraha si ay kuugu hagaan wada hadalka tobobarayaasha.
- Waxa aad isku daydaa inaad bixiso hormar xirfadeed oo joogto ah oo la xidhiidha heerarka.
- Samee qiimayn sanadkii ah oo ay kamid yihiin kormeerka tobobaraha, qiimaynta ka qayb galka, iyo dib iskugu noqoshada.

## Qoraalada Kormeerka Tobobaraha

Foomka Heerarka Tobobaraha waxaa weeye meesha looga duulo qoraalada kormeerka tobobaraha. Qoraalada waxaa loo adeegsadaa kormeerka hore iyo joogtada ah ee tobobaraha. Qoraaladu waxay waafaqsan yihiin muujinaha kormeer iyo talaabo oo waxay siiyaan dalbadaha tobobaraha iyo tobobarayaasha wakhtigan faahfaahinta aagaga heerarka, si markaa ay u sii wadi karaan xoojinta nidaamkooda.

## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Kala xidhiidh Kooxda Hormarka Xirfadeed **training@dcyf.wa.gov**.